

09/16/2020

Gacaliyeyaal Waalid / Masuuliyeyaal:

Vitae Care, Inc. waxay la shaqaysaa iskuulka degmada Morgan County RE-3 si loo siiyo talaalka hargab xilliyeedka caruurta iskuulka. Tallaalkani wuxuu ka difaacayaa dhammaan saddexda nooc ee hargabka la filayo inay sannadkan gudbaan. Waxaan qaban doonnaa rugaha talaalka ee bilaabanaya deyrta, iyo Iskuulka degmada Morgan County RE-3 ayaa kuu soo sheegi doona taariikhaha gaarka ah. Waxay kuxirantahay inay qaateen talaalada infalawansada waqti hore, caruurta qaar kayar da'da sagaal sano waxay ubaahanyihiin labo qadar oo talaal ah oo kadhaxeysa 4 isbuuc. Vitae Care, Inc. waxay lahaan doontaa laba rugo caafimaad oo talaal ah mid kastoo kamid ah iskuulada RE-3 ee Degmada Morgan County.

Foomka oggolaanshaha tallaalka waxaa ka mid ah xulashooyinka kuu oggolaanaya inaad aqbasho ama diiddo tallaalka ilmahaaga. Haddii aad diiddo, tallaalka lama siin doono ilmahaaga. Waxaa jira laba qaab oo aad aqbali karto:

1) Akhri foomka "Maxaad u baahan tahay inaad ogaato" oo ay weheliso warqaddan ku saabsan cudurka iyo tallaalka.

- Saxeex oo taariikhda ku qor foomka oggolaanshaha ee kujira si aad u aqbasho tallaalka ilmahaaga.

Ku soo celi foomka oggolaanshaha dugsiga.

- Haddii aad aqbasho tallaalka, tallaalka waxaa la siin doona cunuggaaga inta lagu jiro rugta tallaalka.

- Shaqaalaha dugsiga ayaa kula socodsiin doona goorta rugta talaalka la qaban doono qiyaastii [2 toddobaad] kahor.

- Haddii, waqti kasta, aad beddesho fikirkaaga ku saabsan tallaalka ilmahaaga, waxaad u wici kartaa Vitae Care, Inc. at 1-844-824-7227.

2) Hadaad doorbideyso, waad sugi kartaa ilaa shaqaalaha iskuulka kuu soo diraan xirmo macluumaad labaad oo u dhaw waqtiga tallaalka lagu bixin doono Iskuulka Degmada Morgan County RE-3. Xirmadan ayaa waliba leh "Maxaad u baahan tahay inaad ogaato" oo ku saabsan cudurka iyo tallaalka iyo waliba foom oggolaansho oo aad saxeexi karto oo aad taariikhda ku aqbali karto inaad u oggolaato tallaalka ilmahaaga.

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah oo ku saabsan tallaalka ama rugaha talaalka, fadlan soo wac: 1-844-824-7227 laga bilaabo 9AM illaa 5PM. Fadlan booqo websaydhka hargabka CDC ee ah <http://www.cdc.gov/flu/> iyo sidoo kale <http://www.cdc.gov/flu/parents> si aad u hesho macluumaad dheeraad ah gaar ahaan waalidiinta. Bixiyaha xanaanada caafimaadka cunuggaaga ayaa waliba ka jawaabi kara su'aalahaaga ku saabsan fayraska infalawansada wuxuuna awood u yeelan karaa inuu siiyo cunuggaaga tallaalka hargab xilliyeedka.

Si daacad ah,

TILMAAMAHA XARUNTA XARUNTA